



Xaaskaaga caafimaadkeeda hormari

Xaaskaaga miyey soo martay gudniinka fircooningaa? Gudniinka fircooningaa waxaa dhici kara, in uu ku hayo xaaskaaga dhibaatooyin badan, oonad adigu ogayn. Xaaskagu markii horena wey la soo dhibaatootay fircooninga, haddana dhibtii waxaa dhici karta in ayna ka hadhin. Haweenka la qabo dhiibaatooyinka ugu badan ooy kala kulmaan fircooninga waxaa ka mid ah galmeda oo xanuu jisa, hamiga oo saas awgeed u yaraada iyo xubnaha taranka oy qallayl iyo cidhiidhi ka dareento. Waxaa u sii raaci kara xubnaha taranka oo siyaabo kala duwan u xanuuna.

Xaaskaaga haddii hammigeedu hooseeyo ama xanuun dareento, waa wax caawimo loo raadin karo. Kula tali in ay caawimo raadsato. Caafimaadka qoyska in la hormariyo wax ceeb ah kuma jirto. Diintenna quruxda badan dadka waxay ku dhiirri gelisaa, in ay dhibaatooyinka haysta dadka cilmiga leh ula tagaan. Caafimaadka qoyska waxaa cilmi u leh dhaktarrada, neuvolada iyo isbitaallada dhalmada. Haddii xaaskaagu ay xishood badan tahay, adiguba waad u hadli kartaa.

Qoyska ay hooyadu ka caafimaad qabto qoyskaa oo dhan
baa caafimaad qaba.